

Warbixin macaamiil ee ku saabsan juqaal/Cirbad ka hortagga uurka

Warbixin ku socota shaqsiyaada horay u isticmaalay juqaasha maarta ah ee Novaplus T380 ee ka hortagga uurka.

Nasiibdarro waxaa soo baxay in qaar ka mid ah juqaalahaan noocan qalad lagu arkay halka laga soo saaray oo taasina micnaheedu tahay in ay jabi karayaan. Juqaashu waxa ku jabi gudaha ilmogaleenka ama marka la soo saarayo. Gobolka Skåne waxaa juqaashan laga isticmaalayay sanadihii 2015 ilaa iyo 2018. Qiyaastii tiro 10% ah ee ah tirada juqaasha dadka ku nool Skåne la galiyay ayaa muujiyay in ay jabayaan. Waana tiro ka saraysa tirada ay soo saarayaashu ku qiyaasayeen markii ay qaladka arkeen. Markii qaladka la arkayna waa aan joojinay isticmaalida juqaashan ka samaysan maarta.

Hadii ay qaybaha juqaasha dhamaan soo wada baxeen?

Hadii ay qaybaha juqaasha oo idil soo wada baxeen markaa uma aad baahnid in aad wax samayso. Waxa aad juqaal cusub ka helaysaa umulisada ku qaabilsan.

Maxaa dhacaya hadii qayb ka mid juqaashu ay wali harto?

Hadii qaybaha juqaasha oo idil aysan soo wada bixin wali waxaa dhici in wali qayb ku harsantahay ilmogaleenka. Waxaa sidoo kale dhici karaysa in qaybaha ay soo raaceen dhiiga caadada adigoon ka war hayn. Waxa aad markaa samaynaysaa in aad sugto labada caado watiyeed ee xiga oo aad markaana il gaar ah u yeelato in juqaashu soo raacdo dhiiga iyo in kale. Umulisada ayaa ku tusi karaysa sida ay juqaashu u egtahay si aad u ogaato waxa aad isha gaarka ah u yeelanayso. Hadii aysan markaa qaybaha juqaasha aysan soo bixin waqtiga caadada ee koobaad iyo kan labaadba kadib markii lagaa saaray juqaasha waxaa aad markaa la xirii-raysaa umulisada si markaa aad dib u eegig iyo caawinba u heshid

Baaritaanada

Hadii markaa laga shakinsanyahay in qayb ka mid ah juqaasha ay wali ilmogaleenka ku hartay markaa waxa aad lagu saarayaa raajo. Waxaa markaa lagu soo dirayaa warqad ballan ah ee baritaanka oo ka dhacaya Malmö, Helsingborg, Simrishamn ama Kristianstad, adiga ayaa dooranaya halka kugu haboon. Hadii markaa uu qayb ku hartay markaa waa la soo saari karayaa iyadoo la isticmaalayo kaamiro la galinayo ilmogaleenka. Baaritaankani waxaalagu sameeyaa meelo qaas ah ama isbitalka.

Cillado miyaan ka dhaxli karayaa juqaal xumaatay?

Wali ma aysan dhicin in shaqsi uu ka dhaxlo caqabado caafimaad ka dib markii laga soo saaro juqaasha oo idil.

Wali difaac uur miyaan leeyahay hadii qayb juqaasha ahi igu hartay?

Maya, waa in aad isticmaashaa waxyaabo kale ee uurka kaa difaaca inta lagaa soo saarayo qaybaha juqaasha. Waydii umulisadaada talooyin iyo caawin ku saabsan aaladaha difaaca uurka. Hadii aad isticmaali karayso juqaasha maarta ah oo kaliya waa aad heli karaysaa mid inta aad sugayso baaritaanka raajada, laakiin waa in la soo saaraa ka hor inta aan baaritaanka la samayn.

Waqti intee la eg ayay igu qaadanaysaa in aan baaritaanka helo?

Waqti qaybta caafimaadka ee dumarka waxa aad ka helaysaa muddo sedex bilood gudahood ah laga bilaabo marka dalabka umulisada uu soo gaaro qayba qaybta caafimaadka ee dumarka.

Juqaal cusub miyaanla i galin karayaa?

Haa, kadib markii dhamaan qaybaha juqaash soo wada baxaan markaas ayaa lagu galin karayaa juqaal cusub. Juqaasha maarta ahi waa bilaash.

Magdhaw miyaan dalban karayaa?

Dhamaan bukaanada uu dhaawac ka soo gaaro daryeel cafiimaad iyo xanuun waxa ay xaq u yeelan karayaan magdhaw sida ku xussan sharciga dhawaca bukaanada. Dacwada waxa aad ka samayn karaysaa www.lof.se halkaas oo aad arrintaada kala socon karayso si dhijital ah. Waxa aad sidoo kale bogga Löfs kasoo dajisan karaysaa foom ama waxa aad codsan karaysaa in gurigaaga laguugu soo diro.